WhatsApp

Maxaan u adeegsan karaa whatsApp?

- Whatsapp waa barnaamij lagu wadaago fariimaha dag-dagga ah.
- Waxaad ku diri kartaa fariimo qoraaleed, sawiro iyo muuqaalo.
- Waxaad fariimo u diri kartaa hal qof ama koox dad ah.
- Waxaad si muuqaal ah ula sheekeysan kartaa qof kale.
- Waxaad si cod ah u duubi kartaa fariintaada.

- Waxaad dadka la wadaagi kartaa meesha aad joogto muddo dhan ilaa 8-saacadood.

Sideen ku nabad gali karaa?

Ka digtoonoow!

- Group-yada WhatsApp-ka waxaa loo adeegsan karaa in dadka lagu dhibo.
- Wuxuu noqon karaa mid aad caadeysato isticmaalkiisa.
- Qof kasta ayaa soo diri kara muuqaalo ama sawiro aan munaasab eheyn.
- Ma dacweyn kartid fariimo qoraaleedyada aan habooneyn.
- Qofkasta oo heysta number-kaada wuxuu wax kuugu soo diri karaa WhatsApp.

- Waxaad iska xiri(baloogi) kartaa qofki aad rabto.
- Waxaad adeegsan kartaa marki aad heysato qad(net), weyna adagtahay in la xakameeyo adeegsigiisa.

Instagram

Maxaan u adeegsan karaa Instagram?

U daji nidaam kuu gaar ah muuqaalada iyo sawirada bogaada.

- Instagram waa barnaamij lacag la'aan ah oo lagu wadaago muuqaalada iyo sawirada.
- Waxaad galin kartaa sawiro iyo muuqaalo.
- Waxaad la wadaagi kartaa dadka ku raacda.

- Waxaad la wadaagi kartaa koox saaxiibadaada ah kaliya.
- Dadka ku raacda iyo saaxiibadaa, waxey daawan karaan muuqaaladaada iyo sawiradaada, ra'yina ka dhiiban karaa, waxey saari karaan Like, siina Share-garey karaan.
- Qofkasta oo jira 13 ama ka weyn wuxuu iska diiwaan galin karaa Instagram.

Sideen ku nabad gali karaa?

Ka digtoownoow sir-sirashada, caga-jugleynta elekterooniga ah iyo wadaagitaanka xad ka baxa ah.

- Ka laabo raacashada ama iska xir(baloog) qofka soo dhiga muuqaalada ama sawirada aan wanaagsaneyn.

- Dacwo ka gudbi waxkasta oo ka hor imaanaya sharciyada Instagram.
- Hubi in xisaabkaadu yahay mid gaar ah(ay arki karaan saaxiibadaada oo kaliya) ama mid guud.
- Dacwo ka gudbi caga-jugleynta iyo dhibka.
- Iska tir kommentiyada aadan rabin.
- xaqiiji inaad ku qanacsantahay sawiradaada iyo muuqaalada marki aad la wadaageyso.
- Ha sameyn wax aadan ku qanacsaneyn. Raadso qofku caawiya.

Facebook

Maxaan u adeegsan karaa Facebook?

U daji nidaam kuu gaar ah muuqaalada iyo sawirada bogaada.

- Waxaad ra'yi ka dhiiban kartaa, siina share-gareyn kartaa sawirada.
- Waxaad diri kartaa fariimo qoraaleedyo.
- Waxaad dhigi kartaa, daawan kartaa, ra'yina ka dhiiban kartaa muuqaalada.
- Waxaad ra'yi ka dhiiban kartaa bogaga saaxiibadaa.
- Waxaad si toos u tabin kartaa muuqaal adigoo adeegsanaya Facebook Live
- Waxaad bad-badali kartaa dhigaalada xaaladda.
- Waxaad joogteyn kartaa liiska saaxiibadaada.
- Waxaad sameyn kartaa wadasheekeysi online-ah.

Sideen ku nabad gali karaa?

Ka digtoownoow sir-sirashada, caga-jugleynta elekterooniga ah iyo wadaagitaanka xad ka baxa ah.

- Deji nidaam shakhsiyeed quseeya waxa aad arki karto, bogaaga iyo sawirada.
- Kaliya saaxibadaa saaxiibadood ayaa kula saaxiibi kara.
- xakameey cidda arki karta waxa ku jira bogaaga.
- Hubi cidda arki karta cinwaankaaga iyo number-ka taleefankaaga.
- Badal cidda heli karta facebook-gaada, marki magacaaga la raadiyo.
- Ha la wadaagin macluumaadkaaga shakhsiga ah barnaamijyo aadan garaneyn.
- Iska-xir qofka, dacweeyna bostiyada haddii aad dareento ineysan munaasib eheyn.

Youtube

Maxaan u adeegsan karaa YouTube?

Ka digtoonoow waxyaalaha aan habooneyn.

- Daawo, abuur, ra'yina kadhiibo muuqaalada.
- Ka furo koontadaada kuu gaarka ah YouTube,
- Sameyso liis muuqaalo kuu gaar ah, ama xitaa
- Sameyso kanaalkaada
- Yeelo bog guud. Kana tabi muuqaal toos ah.

Sideen ku nabadgali karaa?

1) Dadku waxey soo qori karaa kommentiyo xun-xun.
2) Waxaad arki kartaa waxyaalo aan habooneyn.
3) Waxaa ka buuxa xayeysiimo.
4) Dadka adeegsada YouTube waxey noqon karaan dad xun-xun

- Hubi muuqaalada adigu.
- Laakiin ahaaw daacad.
- Kusoo rog hab xakameyn adag ah.
- Sameey koonto qoys.
- Sameey liis muuqaalo ah.
- Adeegso webseedyo kale.
- Il gooni ah ku haay kumbiyuutarka.

- La soco waxyaabaha ay galiyaan YouTube-ka.
-

Snapchat

Maxaan u adeegsan karaa Snapchat?

U dir sawiro saaxiibadaa, markey arkaanna, dib uma arkayaan!

- Adeegsadayaashu waxey snap-gareeyaan sawir, muuqaal una diraan saaxiib.
- Raaci qoraal ama saameyn.
- Dooro mudada fariinta la arki karo.
- Dooro cidda aad fariinta u direyso.
- Marki fariinta ama sawirka la daawado, wey is tirtireysaa*

- Xaaladaha ama story-ga snapchat, waxaa la daawan karaa 24-saac gudahood.
- Maalinkasta hal mar, ayuu adeegsaduhu dooran karaa inuu mar labaad daawado muuqaalka ama sawirka.

Ku nabadgalidda Snapchat

Digtoonoow waxaad screenshot ka qaadi kartaa fariin kasta

- Haku darin dad aadan garaneyn liiska saaxiibadaada.
- Iska xir(baloog) dadka aadan aqoon ee isku daya iney kula soo xariiraan.
- Ha dirin snap-yo aan munaasib eheyn.
- Ka dhig meesha aad joogto khaas.
- Ha ku bixin macluumaadkaaga shakhsigaa Snapchat.

- Run ka sheeg da’daada.
- Waxaad iska xiri kartaa ama iska tiri kartaa qofkaad rabto.
- Sameey nidaam shakhsiyeed, si, saaxiibadaa oo kaliya ay kuula soo xariiri karaan ama daawan karaan.